



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of information Culture And Tourism

Date: 05/08/2020


TACSI.

Muqdisho, 05 August 2020, Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxay ka tacsiyadeyneysaa Geerida Naxdinta leh ee ku timid Allaha u Naxariistee Marxuumad Drs. Xaawa Cabdi oo ku geeriyootay Magaalada Muqdisho

Drs Xaawo Abdi waxa ay aheyd hooyo Soomaaliyeed oo baal dahab kaga jirtay taariikhda Soomaaliya, waxaana lagu xasuusan doonaa adeegyadii Samafal iyo Caafimaad ee ay u fidin jirtay danyarta Soomaaliyeed xiliyo adag.

Drs. Xaawo Abdi waxay Xarun Caafimaad oo Hooyada iyo Dhalaanka ah ka hergalisay duleedka Magaalada, taas oo si bilaash ah loogu daryeelo hooyooyinka iyo Dhalaanka Soomaaliyeed.

Dowladda Soomaaliya waxay si gaar ah xanuunka iyo Murugada ula qeybsaneysaa Qoyskii iyo Ehelada ay ka baxday Marxuumadda Waxayna Alle SW uga baryeysaa in uu Janatul Fardowsa ka waraabiyo.



DHAMAAD